

Mashruuca Kaydinta Daawooyinka



More info: 651.633.EASY (3279)

www.RamseyAtoZ.com

Mashruuca Kaydinta Daawooyinka

Si badbaadsan u daadi ama u fagee dawooyinka aadan u baahnayn, dhacay ama aadan hada kadib isticmaalin oo waxa aad geysaa mid kamid ah labada sanduuq ee loogu talo galay bulshada degmada Ramsey kuwaas oo LACAG LA'AAN AH. Mashruucan oo socondoonaa sanadka oo dhan waa mid loogu talagalay in lagaga hortago dambiyada laguna illaaliyo daryeelka deegaanka. Keydsashada dawooyinka aan loo baahnayn, dhacay ama aan la isticmaalin waxa ay sababi kartaa in daawada lagu xadgudbo ama sumoobo, haddii lagu daadiyo meelaha qashinka lagu qubo ama bullaacadaha waxay keeni kartaa inay dhaawacdo deegaanka.

Daawooyinka la'ogol yahay:

Daawooyinka la'ogol yahay waxay noqon karaan noockasta sida kuwa dhakhtarku qoro, kuwa iskaa aad farmashiyaha uga iibsan karto ama kuwa xoolaha. Waxay noqon karaan qaab kasta sida kaabsoolka, daawooyinka sharoobada, budo iyo kuwa dareeraha ah.

Waxyaabaha aan la ogolayn:

Cirbadaha ama wixii dadka mudaya (kuwaasi waxaad bilaash u keeni kartaa Degmada Ramsey xarunta loogu talagalay waxyaabaha khatarta ah ee qashinka aan la raacin karin oo ku taala: 5 Empire Dr. Saint Paul). Lama ogola in sanaaduuqdan lagu rido daawooyinka ay leeyihiin ganacsatada, hayadaha caafimmaadka, farmashiyada, dhakaatiirta ama xarummaha xoolaha. Waxaa kaliya oo la ogol yahay daawooyinka ay keenaan dadwaynaha deggan degmadan.

Qaa'eynuunka:

U daa daawooyinka kaartoonkii aad ku soo iibsatay kuna rid bac laga dhex arki karo si loo arko waxa ku jira. Isticmaal qalinka loo yaqaan maarkarka oo ka masax magacaaga daawada dusheeda ku qoran. Daawooyinka aan ku jirin sanduuqeedi hore, ku qor magaca daawada bacda dusheeda.

Meelaha lagu ururin doono

Saacadaha:

Isniinta- Jimcaha
8arroornimo-4galibnimo
Waxa ku soo dhawayn doona shaqaale
Uma baahnid inaad tusto Sharcigaaga
Waxaad heleysaa meel aad gaariga
dhigato oo lacag la'aan ah.

